

Sideen ku caawin karaa?

Hagaha bulshada ee Doorashooyinka

Annaga oo ah Adeegyada Doorashooyinka iyo Codbixinta Minneapolis, waxaan ku faannaa bulshadeenna. Sannad kasta oo doorasho, Minneapolis waxay waajahdaa ka qaybgal xooggan oo codbixiyeen ah iyo dadka deegaanka oo si firfircoon uga qayb qaata—ha noqoto inay ka shaqeeyaan goobaha codbixinta ama inay ka caawiyaan in deris uu codsado warqadda codbixinta. Sida hal-ku-dhigga xafiiskeena uu leeyahay: **Magaaladaada.Codkaaga**. Hoos waxaa ku xusan siyaabo fudud oo aan xisbina ku xidhnayn oo aad u taageeri karto codbixiyeyaasha, kuna caawin karto in doorashadu u socoto si habsami leh oo uu qof walba heli karo.

1

La wadaag macluumaadka doorashada ee saxda ah

Ka caawi cod-bixiyaasha inay helaan faahfaahinta saxda ah adigoo la wadaagaya macluumaadka muhiimka ah sida taariikhda codaynta, saacadaha, iyo goobaha. Sida ugu wanaagsan ee loo xaqiijin karo saxnaanta waa in la raaco oo lala wadaago macluumaadka ka yimaada ilaha rasmiga ah ee Adeegyada Doorashooyinka iyo Codbixiyaasha Minneapolis:

vote.minneapolismn.gov

   @votempls

2

La wadaag macluumaadka guud ahaan luuqaddaha

Haddii aad luuqaddo badan ku hadasho, waxaad ka caawin kartaa in macluumaadka muhiimka ah ee doorashada uu gaadho xubnaha kala duwan ee bulshadaada.

3

Ku dhiirigali dadka inay sameeyaan qorshe codayn

Xusuusi dadka kale inay hore u qorsheeyaan goorta iyo sida ay u codayn doonaan—ha noqoto mid hore, mid boosta ah, ama Maalinka Doorashada.

4

Ka caawi dadka kale inay ogaadaan dookhyada codaynta

Dadka qaar ma oga dhammaan doorashooyinka la heli karo. Tusaale ahaan, dadka baabuurtooda aan kasoo dagi karin waxay ku dhex codayn karaan gaarigooda haddii ay ku habboon yihiin. Si aad wax badan uga ogaato codaynta, la xidhiidh **311** si aad u hesho caawimaad.

5

Shaqada inta lagu guda jiro codaynta

Codbixintu waxay bilaabataa 46 maalmood ka hor Maalinka Doorashada, taas oo bixisa fursado dheeraad ah oo lagu taageero codbixiyeyaasha si fool ka fool ah iyo in laga caawiyo nidaaminta warqadaha codbixinta dadka maqan.

6

U adeeg Sidi Garsoore Doorashada

Garsoorayaasha Doorashadu waxay muhiim u yihiin hawlaha Maalinka Doorashada. Waxay ka caawiyaan diiwaangelinta codbixiyeyaasha, bixinta warqadaha codbixinta, iyo taageeridda guud ahaan nidaamka codbixinta ee goobaha codaynta. Waxaan aqbalnaa foomamka danaynta sannadka oo dhan. Iyadoo aan helno codsiyo badan oo aan u kala qaybino hawlaha iyadoo lagu saleynayo ku xidhnaanta xisbiga iyo baahiyaha bulshada (sida xirfadaha luuqadda), waxaan ku dhiirrigelinaynaa qof walba inuu codsado—xitaa haddii aan isla markiiba lagu dooran.

7

Ka caawi jaarka inay isdiwaangaliyaan si ay u codeeyaan ama ay u codsadaan codaynta boosta lagu dhiibto

Marka codbixiye codsado, waxaad ka caawin kartaa inuu buuxiyo diiwaangelinta codbixiyaha ama codsiga warqadda codbixinta ee boostada. Ka caawi inay fahmaan oo maraan nidaamka iyagoo adeegsanaya ilaha rasmiga ah. Booqo vote.minneapolismn.gov si aad u raadiso linkiyada ama foomamka la daabici karo, ama la xidhiidh **311** si aad u codsato foomka boostada ee laguugu soo dirayo.

8

Ka caawi jaarka inay soo celiyaan waraaqaha codaynta boostada

Codbixiyeyaashu waxay u baahan karaan caawimaad si ay u soo celiyaan warqaddooda codbixinta ee ay dhammaystireen. Hubi inaad raacdo dhammaan tilmaamaha gobolka ee khuseeya markaad ka caawinayso soo celinta warqadda codbixinta.

9

U fidi gaadiid lagu tago goobaha codaynta

Gaadiidku wuxuu ku noqon karaa caqabad codbixiyeyaasha qaarkood. Inaad u fidiso gaadiid jaarka ama xubin kamid ah bulshada waxay ka caawin kartaa inay awood u yeeshaan inay codeeyaan.

10

Taageer dedaalada lagu samaynayo wacyigalinta

Mutadawacnimo kula shaqee ama la wadaag macluumaad ka yimaada ururro lagu kalsoon yahay oo aan xisbi gaar ah taageersanayn, kuwaas oo diiradda saaraya wacyigalinta iyo helitaanka adeegyada.